# Sharciga Gaarka ah ee Kurayda Muhaajiriinta ah (SIJS) "Kurayda Khatarta ku Sugan"

Special Immigrant Juvenile Status (SIJS) - "At-Risk Juveniles"

Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada (USCIS website) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

## Waa Maxay Sharciga Gaarka ah ee Kurayda Muhaajiriinta ah la siiyo (SIJS)?

Haddii aad tahay:

- Kuray muhaajir ah
- Aan ku lahayn sharci deganaansho rasmi ah wadanka US
- Lana nool kaliya hal waalid ama aan la noolayn labadda waalid midkoodna ama ay kugu tacadiyeyaan iminka ama horey ay kuugu tacadiyi jireen mid ama labadda waalidba

Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato inaad hesho "Sharci Gaar ah oo Kurayda Muhaajiriinta ah la siiyo" ama SIJS. Helida amarka SIJS waxa ay kuu ogolaan inaad wadanka si sharci ah ku joogto.

Hay'adda Adeega Muwaadinka iyo Muhaajirnimaddu [U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS)] waxa ay ku haysaa khayraadyo badan oo ku saabsan arrintan shabakadeeda (website).

- Ka akhri xaq u yeeladka SIJS iyo sida uu u shaqeeyo barta (SIJS eligibility and how it works).
- Ka akhri su'aalaha inta badan la iswaydiiyo (frequently asked questions) ee ku saabsan SIJS.



## Ciddee ayaa heli karta sharciga SIJS?

Waxa aad u baahan tahay:

- inaad ka yar yahay 21
- aadan guursan
- aad ku sugan tahay wadan United States aadna
- iminka ku lug leedahay kiis gobol oo ku saabsan hayntaada ama daryeelkaaga AMA aad doonayso inaad bilowdo kiis aad ku codsanayso in qofka weyn oo aad aaminsan tahay oo nololaasha qayb ka ahi uu ku hayo ama uu mas'uul kaa noqdo.

Amar maxkamad gobol ka soo baxa ayaa ah daliisha laga maarmaanka ah ee aad u baahan tahay si aad u codsato SIJS. Hubi inaad la tashato qareen ka hor inta aadan ka xareyn wax codsi ah oo amar maxkamad gobolku leeyahay ah maxkamadaasi mid kay rabtaba ha noqotee. Tani ujeedadeedu waa in la hubiyo in amarkaaga laga xareeyo maxkamada gobolka ee saxda ah IYO uuna leeyahay dhamaan hadalka loo baahan yahay.

**OGOW: waa KHASAB inaad haysato amar maxkamaddu gobolku soo saartay oo uu saxiixay xaakim AYNA hay'adda USCIS ay hesho codsigaaga SIJS ka KA HOR inta aadan gaarin 21.** Haddii hay'adda ay hesho codsigaaga SIJS ka gaartay 21 sanno jir, xaq uma yeelanaysid SIJS.

Ka hor inta aadan ka dalban SIJS hay'adda USCIS ka, maxkamadda gobolku waa inay si cayiman ugu go'aamisaa wax kaas ah oo adiga kugu saabsan amar maxkamadeed. Go'aamadaasina waa:

- inuu kugu tacadiyey, ku dayacay, ama uu ku cidleeyey mid laba labadaada waalidba

- Sababta oo ah tacadi, dayac ama cidleyn awgeed inaad dib ugu noqoto inaad la nolaato ama aad dib ugu xiranto mid ama labadaa waalid aysan suurtagal ahayn IYO

- Inaysan maslaxadaada ahayn in dib laguugu cesho wadankaagii ama meeshii ugu dambaysay ee aad ku noolaan jirtay.

Minnesota, waxaa ka jira noocyo kala duwan oo maxkamadaha gobol ah oo arrintani ay ka dhici karo. Waxaa ku jira kuwaa kiisaska ilaalinta kurayda (sidda kiisaska ilaalinta ilmaha), kiisaska maxkamadda qoysaska ee ku taxaluqa waalidka midka loo xukumayo inuu ilmaha haysto, kiisaska kurayda dambiyadda gala iyo "**kiisaska mas'uul ka noqoshada kurayda khatarka ku sugan.** Warqadda xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa raadinta amarka SIJS iyadoo la adeegsanayo mas'uul ka noqoshada 'kurayda khatarta" ku sugan.

Kolka aad ka codsato shacriga SIJS hay'adda USCIS, waxaad kaloo u baahan tahay cadeyn sharci ah oo ah goorta iyo meesha aad ku dhalatay. Waxa aad u baahan tahay inaad tan la xareyso codsigaaga. Haddii aad doonayso inaad dalbato sharciga SIJS aadana haysan warqad dhalasho, waa ra'yi wacan inaad mid soo hesho sidda ugu dhaqsaha badan ee aad awoodo. Haddii aadan heli karin warqad dhalasho, waxaa jira cadeymo kale oo noocyo kale oo cadeyn kara da'daadda oo aad siin karto hay'adda . Gal barta https://www.uscis.gov/working-in-US/eb4/SIJ. Riix "Sidda Loogu Dacwoodo Cadeynta SIJ" "How to Petition for SIJ Classification (Form I-360)" si aad wax ugu ogaato waxyaabaha kale ee cadeynta da'da ah ee ay aqbalaan.

## Ciddee heli karta mas'uul ka noqoshada "kurayda khatarta ku sugan?"

Mas'uul ka noqoshada "kuryada khatarta ku sugan" ee Minnesota waxaa la siiyaa dadka:

- u dhaxeeya da'aha 18 ilaa iyo 21 Jirka
- aan guursan ayna
- ayna dhici karto inay xaq u leeyihiin amarka SIJS



haddii ay dhici karto inaad xaq u leedahay sharciga SIJS, laakiin aad ka yar tahay 18 sanno jir, ma heli **kartid** mas'uul ka noqoshada noocan oo kale ah. Waxaa jira siyaabo kale oo aad ku raadsan karto SIJS. Kala tasho qareen yaqaan sharciyada muhaajiriinta (immigration).

Hubi inaad hesho qareen sharciyada SIJS ee laanta socdaalka (immigration) yaqaan oo leh shati iminka. Dhib ma leh inaad waydiiso qareen sharciyadda laanta socdaalka khibrad u leh inuu ku tuso shatigiisa qareenimada uuna kuu sharxo inta uu ka yaqaan sharciga SIJS ka hor inta aadan qabsan. Si aad u hesho qareen khibrad u leh sharciyada laanta socdaalka gal barta https://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics. Haddii ururadda aad soo hesho midna uusan ku caawin karin, waxa ay ku siin karaan liis qareemo iskood u shaqeystaa ay ku qoran yihiin oo laga yaabo inay ku caawiyaan.

## Siddee ayaan ku helaa sharciga SIJS anigo adeegsanaya mas'uulka noqodka kurayda khatarta ku sugan?

Waxaa jira dhowr talaabo oo ay khasab tahay inaad qaado.

1. La kulan qareen sharciyada muhaajiriinta yaqaan (immigration) si aad u go'aansato in amarka SIJS uu yahay wax aad dooran karto oo adiga oo kugu haboon.

   Ka hor inta aadan dalban amarkan, waxa aad u baahan tahay inaad tagto maxkamadda kurayda ee gobolka. Qareenkaaga muhaajiriinta (immigration) ayaa waxaa dhici karta inuu kaa caawiyo helida amarka maxkamadda gobolka. Ama waxaa dhici karta inay hayaan fikraddo ku saabsan cidda kaa caawin karta helida amarka maxkamadda gobolka. Haddii aadan haysan lacag aad ku qabsato qareen, waxaa laga yaabaa inaad ka hesho caawimaad ururo samafal ah oo deegaanka ka jira. Eeg qaybta hoose, ee "ciddee iga caawin karta nidaamkan?"

   Haddii aad rabto inaad isku daydo inaad bilowdo nidaamkan kaligaa, waxaa jira foomam iyo akhbaar (forms and information) ku jira shabakadda maxkamadda (website). Nidaamkan waa dhib badan yahay! Waa inaad hubiso inaad sameyso waxyaabaha qaarkood sidda:
   - Ogaysiinta waalidkaa kiiska maxkamadda ee aad xareynayso
   - Buuxinta iyo ka xareynta foomamka maxkamadda markiiba
   - Bixinta khidmadda maxkamadda ama dalbashada saamixida khidmadda, iyo
   - Hubinta inaad tagto dhagaysiyadda dacwadda ee maxkamadda

   Waxaa fiican in lagala shaqeeyo qareen arrintan haddii aad awoodo.

2. Hel qof diyaar u ah inuu kaa noqdo mas'uul. Maxkamaddu waa inay ansaxiso qofka aad doorato. . Sababtan awgeed, waa muhiim inaad ugu qorto akhbaar codsigaaga Maxkamadda ku saabsan mas'uul ka noqoshada aad codsanayso. Ku qor sababta qofkaasi u yahay qof aad aaminsan tahay iyo sababta aad ugu malaynayso inuu diyaar u yahay inuu ku caawiyo. Qofka mas'uulka kaa noqonayaa waa inuu ku siiyo:
   - hagid iyo caawimaad
   - gargaar dhaqaale iyo mid niyadeed
   - u gudbin khayraadyo si loo caawiyo ka soo bixida baahidaada
   - gudbin iyo khayraadyo si lagaaga ilaaliyo ku danayso galmadda ah iyo mid ku shaqeysi ah ama xad-gudub ah galmadda ama dagaal qoyska dhexdiisa ah, haddii aad khatar u tahay mid ka mid ah dhibaatooyinkaa.

## Waxay sameysaa maxkamaddu?

Xilliga dhagaysiga dacwadaada maxkamaddu waxa ay eegi shuruudaha kor ku xusan ee "Ciddee heli karta amarka SIJS?"

Amarka maxkamadda kurayda ee gobolku waa khasab:



- Inuu kuu magacaabo mas'uul
- In uu go'aamiyo in laguugu tacadiyey, laguu dayacay, ama laguu cidleeyey sida uu dhigayo xeerka gobolka Minnesota iyo in aadan ku noqon karin waalidkaa.
- In uu go'aamiyo inaysan maslaxadaadda ahayn in dib laguugu celiyo wadankaagii

Oraahaha Amarku waa inay lahaadaan faahfaahino cayiman. Arrintani waxay muhiim u tahay hubinta in Amarku uu sharci yahay. Amarku waxa uu u baahan tahay:

- inuu ka soo baxo shuruudaha sharciga si kolkaa magacaabida mas'uulku ay u noqoto mid sharciyeysan, iyo
- inuu ku lahaado dhamaan akhbaarta loo baahan yahay qaybta "go'aaminta." Tani waxa ay u ogolaan hay'adda USCIS inay ogaato inaad tahay Kuray Muhaajir ah oo Gaar ah.

Waa ra'yi fiican in qareen khidbad u leh sharciyadda laanta socdaalka uu eego dacwadaadda ama amarka la soo jeediyey in la helo ka hor inta aan la gabagabayn.

## Siddee ayaan uga xareystaa codsigayga SIJS hay'adda USCIS kolka aan helo amarka maxkamadda gobolka?

Qaybtani waxa ay quseeysaa labadaba 18-21 jiradda ku hela amarka maxkamadda gobolka nidaamka kurayda khatarta ku sugan iyo da'yarta ku hela amaradda maxkamadaha gobolka nidaam kale.

**Kolka aad hesho amarka kurayda ee gobolka**, waxa aad ka codsan kartaa SIJS hay'adda USCIS. Tan waxa aad sameyn adigoo ka xareysanaya Foomka 1-360 (Form I-360) goobta uu ugu qoran yahay gobolkaaga (location listed for your state). Waxa aad u baahan tahay inaad raaciso:

- nuqul ah amarka kurayda ee maxkamadda ee magacaabaya mas'uulka xukumayana go'aaminta SIJS.
- cadeyn ah inaad ka yar tahay 21 sano kolkii aad xareysay, sida warqada dhalashada.
  - Haddii warqadaadda dhalashaddu ama cadeymaha kale ee da'du aysan ku qornayn Afka-Ingiriiska waa inaad ku dartaa turjumaad, iyo waliba shahaado turjumid (certification of translation).

Haddii aad xareysanayso codsigan kaligaa, u akhri dhamaan tilmaamaha xareysiga ee ku jira shabakada (USCIS' website) si taxadar leh! Waa muhiim inaad soo raaciso dhamaan cadeymaha lama maarmaanka ah ee ay hay'adda USCIS u baahan tahay inay ku aragto codsigaaga I-360.

Waxaa ku jira shuruudo aad u cayiman nidaamkan. Waa inaad la kulanto qareen sharciyada muhaajiriiinta yaqaan haddii aadan jaa mid horey u lahayn!

**Kolkaa aad xareysato Foomka I-360 (Form I-360)** oo leh dhamaan cadeymaha loo baahan yahay ee kor looga hadlay, waxaa eegta hay'adda USCIS. Waxa ay dib u eegaan wax walba si ay u hubiyaan inaad ka soo baxday dhamaan shuruudaha aad u baahan tahay inaad ka soo baxdo si aad xaq ugu yeelato SIJS.

## Inta hawsha codsigayga SIJS ay socoto, siddee ayaan u hubiyaa inaan sii wado inaan xaqu leeyahay?




Aad ayey muhiim u tahay inaadan guursan inta aad ka sugayso go'aan ku saabsan codsigaaga hay'adda USCIS. Dhib ma leh inaad xiriiri la lahaatid qof ama xataa aad ilmo dhasho, laakiin haddii aad guursato markaa wixii ka dambeeya sharciga laanta socdaalku kuuma aqoonsanayo inaad ilmo tahay. Xaqna uma yeelanaysid sharciga SIJS markaa wixii ka dambeeya.

Haddii aad guurto inta hawsha codsigaaga SIJS ay socoto, waxa aad u baahan tahay inaad ka cusboobaysiiso ciwaankaaga hay'adda USCIS adigoo xareynaya Foomka AR-11 (Form AR-11). Si aad wax badan uga ogaatid ka bedelida ciwaankaaga hay'adda USCIS, eeg warqadayada xogta aruursan ee *Reporting a Change of Address to USCIS*.

Waxaa jira waxyaabo kale oo muhiim ah oo la sameeyo si loo hubiyo inaad sii wado inaad xaq u leedahay sharciga SIJS inta aad sugayso go'aan. La tasho qareenkii kaa caawiyey inaad hesho amarka maxkamadda gobolka iyo qareenkaaga laanta socdaalka si loo hubiyo inaad og tahay waxa la sameeyo.

## Maxaa dhici haddii aan helo amarka SIJS?

Kolka ay hay'adda USCIS ansixiso amarkaaga SIJS, waxaa dhici karta inaad hesho nacfiyadda qaarkood. La tasho qareen yaqaan sharciyada muhaajiriinta si aad u eegto waxa aad heli karto.

- Qaar badan oo ka mid ah kurayda Muhaajiriinta ee Gaarka ah waxa ay dalban karaan sharci deganaansho rasmi ah (green card) dhowr sanno ka dib kolka ay helaan amarka SIJS. Ka dib kolka aad lahaato sharci degaansho ah (green card) dhowr sanno waxa aad dalban kartaa inaad noqoto muwaadin. Kala tasho qareen yaqaan sharciyada muhaajiriinta talaabooyinkaa xiga ee la qaadayo.

- Qaar ka mid ah Kurayda Muhaajiriinta ah sidoo kale waxaa loo ogolaadaa waxa la yiraa Dib uga Dhigida Musaafurinta. Kolkaa aad hesho martabadda Dib uga Dhigida Masaafurinta waxaa aad heli kartaa:
  – Ilaalinta lagaa ilaalinayo ka saarida wadanka
  – Dalbasho warqad shaqo
  – Dalbasho kaarka sooshal sakuuratiga (social security), iyo
  – Qaar ka mid ah barnaamijyada caafimaad ee dowladda dhexe iyo gargaaradda dhaqaale ee tacliinta ee dowladda dhexe



## Haddii aan helo sharciga SIJS ma dalban karaa sharci deganaansho rasmiga ah (green card)?

Haddii aad hesho sharciga SIJS, inta badan waa aad dalban kartaa kaarka sharciga degnaashaha rasmiga ah (ama "green card") ha dhow. Laakiin waxyaabo gaar ah oo sharcigaaga laanta socdaalka ah ama taariikhdaadda fal-dambiyeedyada ayaa kaa dhigi kara inaadan xaq u yeelan inaad dalbato sharciga deganaanshaha rasmiga ah xataa haddii codsigaaga SIJS la ansaxiyo. Haddii uu hadafkaagu uu yahay inaad hesho sharci deganaansho rasmi ah (green card), la tasho qareen khibrad u leh sharciyadda laanta socdaalka. KA HOR inta aadan dalban sharciga SIJS, waxa aad u baahan tahay inaad hubiso inaad awoodi doonto inaad dalbato sharciga deganaanshaha rasmiga ah (green card) kolka codsigaaga SIJS la ansaxiyo.

Waa inaad sugto inta fiise (visa) ay diyaar ka noqonayso si aad u awoodo inaad dalbato sharci deganaasho rasmi ah (green card). Taasi waxa ay qaadan kartaa dhowr sanno. Haddii aad leedahay qareen khibrad u leh sharciyada laanta socdaaalka oo diyaar u ah inuu kaa caawiyo inaad ogaato kolka fiise (visa) uu noqonayo diyaar, aad ayey muhiim u tahay inaad ka soo kor laabato qareenkaa lixdii biloodba ama sannadkiiba mar si eegto meesha wax marayaan. Siddooe kale, la socodsii qareenka haddii ciwaankaaga ama lambarka telefankaagu uu isbedelo si kolkaa ay uu kuu helo. Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan sidda si loo eego inuu fiise (visa) diyaar yahay iyo in kale, si kolkaa aad u codsato sharci deganaansho ramsi ah (green card), booqo Barnaamijka Sugitaanka ee SIJS ee: https://www.sijsbacklog.com/youthresources.

Haddii aad ku hesho sharci deganaansho ah oo rasmi ah SIJS, uma aad dalbi kartid wax sharci ah labadaadda waalid midna. Tani waa dhab xataa haddii labadaada waalid mid uun uu kugu tacadiyey, ku cidleeyey, iyo/ama ku dayacay. Kala tasho qareen khibrad u leh sharciga laanta socdaalka waxyaabaha aad haysto ee aad kala dooran karto ee ku saabsan noqoshada qof leh sharci rasmi ah oo deganaansho ah iyo/ama doonaya in aan la musaafurin. Kolkaa go'aanso midka ugu fiican ee aad dooran karto ee ku haboon adiga hadafyadaadda.

## Ma la iga qaadi karaa SIJS kayga kolka aan helo ka dib?

Hay'adda USCIS waxa ay kaaga qaadi kartaa amarkaaga SIJS kaliya kolka ay jiraan xaaladdo cayiman. Hal tusaale ahi waa haddii ay maxkamadi go'aansato in amarkaaga maxkamadda gobolku inuusan shaqeynayn markaa wixii ka dambeeya. La tasho qareen yaqaan sharciyada muhaajiriinta markiiba haddii aad ka hesho ogaysiis hay'adda USCIS oronaya inay doonayaan inay kaala noqdaan (kaa qaadaan) amarka SIJS ah ee lagu siiyey.

## Ciddee iga caawin karta hawshan?

Waxaa jira ururo kaa caawin kara fahmida nidaamka ama xataa kaa caawin kara marida nidaamka.

Mid Minnesota Legal Aid
1 (877) 696-6529
http://mylegalaid.org/

The Advocates For Human Rights
https://www.theadvocatesforhumanrights.org/Home
(612) 341-9845

Immigrant Law Center of Minnesota (ILCM)
(651) 641-1011
https://www.ilcm.org/

Volunteer Lawyers Network (VLN) – waxa ay caawiyaan qaybta maxkamadda gobolka kaliya
(612) 752-6677
https://www.vlnmn.org/

## Ka waran hadii aanan helin amarka SIJS?

Haddii maxkamaddu aysan ansaxin codsigaaga SIJS, waxaa laga yaabaa inaad heli karto waxyaabo kale oo aad sameyn karto. Kala tasho qareen yaqaan sharciyada muhaajirnimada arrimaha ah:

- Sharci ku qaadasho ehel
- Fiisaha U (U Visa)
- Fiisaha T (T Visa)
- DACA
- Sharci ku siinta haweenka silcinta
- Magan-gelyo
- Qaxooti/sharci ku qaadasho magan-gelyadda siyaasadeed
- Waalid ku qaadasho muwaadinimo
- Iyo wax kale oo badan



Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Akhbaarta Dhallinyarada Muhaajiriinta ah.*

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**